RASMIGA AH

الجـريدة الرسـمية

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 5aad Muqdisho, 20 Maarso 1977. 1 R

Laanta Faafin Rasmiga ah ee ka tirsan Madaxtooyada J.D.S.

يدة شهرية

waq oo

K O O B N I I N

**BOGGA KOOWAAD**

**S H A R C I**

ee 3 Feberaayo 1977. *Sharciga Gobol-*
*gmooyinka.* *Bogga* 233

977

» 239

» 250

23

*dhan*

» 251

LAW No. 23 21th Febraury *The Agreement bet-*
*the Somali D.R. and* *Development fund,* » 252

L. ee 21

*agu*

»

LAW No. 24 21th February 1977, the Agreement of Arab Development fund » 254

SHARCI L. 24 ee 21 Feb. 77, Nuqul carabi ah. » 255

SHARCI L. 25 ee 21 Feberaayo 1977, *Shaqo ka saarid Xaq la'aan.* » 256

SHARCI L. 26 27.3.1977 meel marin heshiis dhexmaray *Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya iyo dawladda Midowga Soofiyeti* » 257

SHARCI L. 27 ee 27 Feberaayo 1977, *Dhismo Guddi sare ee Dhaqaale.* » 258

**BOGGA LABAAD**

**X E E R**

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 8 Jannaayo 1977., *Magacaabid Garsoore M.B.D. L. 24* » 260

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 3 Feberaayo 1977, *Magacaabid Xoghayaha Guddiga Siyaasadda ee X.H.-KS. L. 25* » 261

*XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 21.2. 1977 ku saabsan Isticmaalka Raadiyayaasha gaarka* L. 26 » 262

**BOGGA SADDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH**

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 16.3.1977, Naada dhul Jaalle Maxamed Macalin Cali. » 264

MAXKAMADDA DEGMADA BERBERA 15.2.1977, *Lumid buugga kaydka L. 2157/7 ku qoran Sh. SO. 900 uu leeyahay Cali Nuur Qaadi Axmed L. 89* » 265

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 20.2.1977 *Lumid jeegga* L. *007216 ku qoran Sh. SO. 3.084 ay leedahay Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta. L. 90* » 266

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 22.1.1977, *Lumid Buugagga kaydka L. 9949 ku qoran Sh. SO. 102 L. 10300 ku qoran Sh. SO. 2.812 uu leeyahay Jaalle Cabdullaahi Sheekh Cali L. 91* » 267

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 27.2.1977, *lumid buugga kaydka L. 290/4 ku qoran Sh. SO. 10.-406 uu leeyahay Sujaacow Suufi Sujaacow L. 92* » 268

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 16.2.1977, Lu*mid Buugga kaydka L. 11314 ku qoran Sh. SO. 1.000* ay *leedahay Xaliimo Maxamuud Gaabow L. 93.* » 269



## BOGGA KOWAAD

## S H A R C I

SHARCI L. 21 ee 3 Feberaayo 1977, Sharciga gobollada iyo Degmooyinka.

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar, 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 19 ee 1dii Luulyo 1976, ee xukunka dalka ku wareejinaya xisbiga XHKS;

ISAGOO AQOONSADAY: Baahida loo qabo in dib loo habeeyo wadista Siyaasadda iyo maamulka ee Gobollada iyo Degmooyinka;

MARKUU DHEGEYSTAY: Talada Golaha Wasiirrada;

ISAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshihii Guddiga Siyaasadda ee Golaha Dhexe ee Xisbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA

QAYBTA KOOWAAD

QODOBKA 1AAD

TILMAAMO IYO MAGAC BIXIN

Marka Sharcigan la raaco, erayada soo socda waxay leeyihiin macnaha mid walba ku hor dhigan:

(1) XEER Waxaa loola jeedaa Xeer samayskiisa Sharci oggolaaday;

(2) XISBI Waxaa loola jeedaa Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

(3) XAFIISKA FULINTA Waxaa loola jeedaa taliska ugu sarreeya oo hoggaamiya hawlaha Xisbiga iyo Maamulka heer Gobol iyo heer Degmo.

(4) XOGHAYE XISBI Waxaa loola jeedaa Xoghaye Guddi Xisbi Gobol ama Degmo oo lagu doortay sida waafaqsan Qodobbada 22aad, 24aad ee xeerka Xisbiga;

(4) Degmo Waxaa loola jeedaa qayb Gobol;

(6) Gobol waxaa loola jeedaa qayb ka mid ah Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya kana kooban laba Degmo iyo wax ka badan.

(7) Guddi MAAMUL GOBOL waxaa loola jeedaa Guddi ka kooban Xafiiska fulinta ee Guddiga Xisbiga Gobolka oo lagu dhisay sida Qodobka 8aad ee Sharcigan;

(8) GUDDI MAAMUL DEGMO waxaa loola jeedaa Guddi ka kooban Xafiiska Fulinta ee Guddiga Xisbiga Degmada oo lagu dhisay sida Qodobka 11aad ee Sharcigan;

(9) GUDDOOMIYE waxaa loola jeedaa Guddoomiye Guddi maamul ee Gobol ama Degmo;

(10) ISUDUWE waxaa loola jeedaa Wakiilka Agaasinka Guud ee Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga ee Gobol.

## QODOBKA 2AAD

## HABKA MAAMULKA DAWLADDA HOOSE

(1) Habka Maamulka Dawladda Hoose ee Soomaaliyeed wuxuu ku dhisnaanaya habka Hantiwadaagga Dimoqraadiga Guddoonka Dhexe sida ay tilmaamayaan warqadda koowaad iyo tan 2aad ee Codka Kacaanka 21 oktoobar 1969.

(2) Dawladaha Hoose waxay ka mid yihiin maamulka guud ee Dawladda Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, waxaanay fulinayaan Siyaasadda Xisbiga iyo Dawladda ee ah in la dhiso bulsho Hantiwadaag ah, oo himiladeedu tahay caddaalad hantiwadaag, sinnaan, wadajir iyo horumar.

## QODOBKA 3AAD

### Habka dhismaha Dalka

(1) Marka laga hadlayo Sharcigan, Dalka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya waxaa loo qaybinayaa Gobollo. Gobolkiiba waxaa loo sii qaybinayaa Degmooyin hadba inta dhulka uu ka kooban yahay le'eg yahay.

(2) Gobollada, Xudduuddooda, Magaalamadaxdooda iyo wixii la mid ah hadba waxaa lagu muujinayaa amar xeerka Madaxweynaha jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, isagoo dhegeystay Guddiga Siyaasadda.

(3) Degmooyinka, Xudduudooda, heerka ay kala yihiin iyo Magaalamadaxdooda hadba waxa muujinaya amar xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.



(4) Gobollada, Degmooyinka iyo wixii la xiriira ee jira marka Sharcigani dhaqan galo, waxa loo aqoonsan doonaa inay sharcigan ku dhismeen.

(5) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, markuu dhegeysto Guddiga Siyaasadda, wuxuu beddeli karaa ama baabi'in karaa gobol kasta ama degmo kasta iyo wixii la mid ah.

## QODOBKA 4AAD

## NABADGELYADA

(1) Nabadgelyada waa arrin si u wada saamaysa Siyaasadda iyo Maamulkaoo labaduba xil u sinnani ka saaran yahay.

(2) Nabadgelyada waxaa ka mid ah difaaca dalka, badbaadada bulshada iyo hantida, amniga iyo Xasilloonaanta Guud.

(3) Gobol iyo Degmo kasta waxa lagu dhisayaa Guddi nabadgelyo oo ka kooban sida soo socota:

| | | |
|---|---|---|
| (a) | Xoghayaha Guddiga Xisbiga | Guddoomiye |
| (b) | Kaaliyaha Xoghayaha Xisbiga ee Siyaasadda | Xubin |
| (t) | Kaaliyaha Xoghayaha Xisbiga ee Maamulka | Xubin |
| (j) | Madaxa Laanta Nabadsugidda iyo Cadaaladda ee Xisbiga. | Xubin |
| (x) | Taliyaha Nabadsugidda ee Gobolka ama Degmada | Xubin — Xoghaye |
| (kh) | Taliyaha Booliska ee Gobolka ama Degmada | Xubin |
| (d) | Taliyaha Xoogga dalka ee gobolka ama Degmada (meeshii ciidammada Xoogga dalka deggan yahay) | Xubin |

(4) Marka Xoghayaha Guddiga Xisbiga maqan yahay ama uusan xilkiisa gudan karayn, waxa Guddoomiye ku-sime ahaanaya Kaaliyaha 1aad ee Xoghayaha Xisbiga ee Siyaasadda.

## QAYBTA LABAAD

### Qodobka 5aad

## XEERKA DEGSIIMADA

(1) Dawladaha Hoose ee ku dhisan Sharcigan waxay ku baahsan yihiin Dalka oo u kala baxsan sida soo socota:

(b) DEGMO
(t) GOBOL
(j) TUULO

(2) Marka Sharcigan laga hadlayo Gobolka Banaadir oo ka kooban Magaalada Muqdisho iyo agagaarkeeda wuxuu ahaanayaa maamul madax bannaan oo leh hadba awoodda iyo xilka uu tilmaamo Amar xeerka madaxweynaha.

Qodobka 6aad

XAFIISKA FULINTA EE GOBOL AMA DEGMO

(1) Waa taliska ugu sarreeye ee hoggaamiya hawlaha Xisbiga iyo maamulka Dawladda heer gobol ama heer degmo wuxuuna u xilsaaranyahay.

(a) Isuduwidda Siyaasadda iyo Maamulka Gobolka ama Degmada;

(b) Gudashada iyo xilka iyo awoodda Guddiga Maamulka ee Gobol ama degmo ee ku xusan sharcigan.

(2) Xafiiska fulinta wuxuu ka kooban yahay Xoghayaha Guddiga Xisbiga, kaaliyaha 1aad ee Xoghayaha Xisbiga dhinaca Siyaasadda iyo kaalyiyaha Xoghayaha Xisbiga dhinaca Maamulka.

(3) Xoghayaha Xisbiga Gobol ama Degmo marka uu gudana yo xilka Maamulka Dawladda wuxuu qaadanayaa magaca Guddoomiyaha Guddiga Maamulka.

Qodobka 7aad

*Sharciyada Guddiyada Maamulka ee Gobollada iyo Degmooyinka*

(1) Guddiyada Maamulka ee Gobollada iyo Degmooyinka waxay lahaanayaan Shakhsiyad Sharci.

(2) Guddiyada maamulka ee gobollada iyo Degmooyinka waxa Sharcigan ka wakiil ah Guddoomooyayaashooda iyo ciddii kalee ay qoraal ku wakiishaan oo ka tirsan Xifiiska fulinta ee ku xusan Qodobka 6aadee isla sharcigan.

Qodobka 8aad

*Guddiga Maamulka Gobolka*

*Guddiga Maamulka Gobolku wuxuu ka kooban yahay:*

(a) Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobolka;

(b) Kaaliyaha 1aad ee Xoghayaha Xisbiga dhinaca Siyaasadda;

(t) Kaaliyaha Xoghayaha Xisbiga ee dhinaca Maamulka.

Qodobka 9aad

*Magacaabidda iyo awoodda Guddoomiyaha*

*Guddiga Maamulka ee Gobolka*

(1) Guddoomiyaha Guddiga Maamulka ee Gobolka waxa noqonaya sharci ahaan qofka haya jagada Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobolka.



(2) Guddoomiyuhu waa kawiilka Dawladda Dhexe ugu qaybsan Maamulka Gobolka oo dhan, wuxuuna u mas'uul yahay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, wuxuuna toos ula xiriiraa ulana shaqaynayaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, oo uu ka qaadanayo tilmaamaha maamulka guud ee Gobolka iyo fulinta mashaariicda, hase yeeshee wuu kala xiriiri karaa Wasaarad kasta iyo Hay'ad walba wixii ayada gaar u saameeya.

(3) Wuxuu kaloo la shaqaynayaa, xiriir toos ahna la yeelanayaa Guddiga Xisbiga ee Gobolka, oo ku leh awood kormeer Maamul guud. gaar ahaan Guddoomiyuhu wuxuu:

(a) mas'uul ka yahay fulinta Siyaasadda Xisbiga ee horumarka dhaqaalaha iyo bulshada sida ku qoran Barnaamijka Xisbiga iyo qorshaha Dawladda ee Mashaariicda Horumarinta iyo hadba awaamiirta Golaha Dhexe iyo go'aannada Guddiga Xisbiga ee Gobolka ee saameeya kor u qaadidda dhaqaalaha iyo bulshada.

awood uu ku kormeero shaqaalaha iyo Laamawarbixinna ka siiyo Wasaaradaha iyo Hay'ada-

(t) Guddoomiyaa shirarka guddiga Maamulka ee Gobolka, go'aannadoodana fulinayaa ama u gudbiyaa Dawladda Dhexe marba say tahay;

(j) mas'uul ka yahay fulinta sharciyada, xeerka Wasiirrada iyo go'aannada Guddiga Maamulka ee Gobolka;

(x) mas'uul ka yahay inuu xaliyo wax alla wixii khilaafaad ah saameeya Maamulka Gobolkiisa;

(kh) Mideeyaa wax qabadka Degmooyinka oo Dhan.

(4 uu Guddoomiyuhu ka maqan yahay Gobolkiisa ama gudan karin waxa hawshiisa sii wadaya ku meel 1aad ee Siyaasadda.

Qodobka 10aad

Isuduwaha Dawladda Hoose

Gobol kasta wuxuu yeelanayaa Isuduwaha Dawladaha Hoose uu magacaabo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya.

Wuxuu kormeerayaa oo mideynayaa Laamaha iyo shaqaalaha dawladda Hoose ee Gobolkiisa oo dhan.

Qodobka 11aad

*Guddiga Maamulka Degmada*

(1) Degmo waliba waxay yeelanaysaa Guddiga Maamulka Degmada oo ka kooban Xoghayaha Xisbiga Degmada, isla markaasna ah Guddoomiyaha Guddiga Kaaliyaha Xoghayaha dhinaca siyaasadda iyo kaaliyaha Xoghayaha dhinaca Maamulka oo dhammaantood isku ah «Xafiiska fulinta ee guddiga Xisbiga Degmada».

(2) Guddiga Maamulka ee Degmadu wuxuu mas'uul u yahay Guddiga Maamulka ee Gobolka.

DEREJOOYINKA AY U KALA BAXAAN DEGMOOYINKU

Degmooyinka waxaa loo kala saaraa, saddex derejo, iyadoo la tixgelinaayo sida dhulkoodu u kala weyn yahay iyo sida xaalka dhaqaalahoodu tacliinta iyo caafimaadkooda kala yahay. derejooyinkaas waxay kala yihiin B.T.J.

Qodobka 12aad

*Magacaabidda iyo Awoodda Guddoomiyaha*

*Guddiga Maamulka ee Degmada*

(1) Guddoomiyaha Guddiga Maamulka ee Degmada waxaa noqonaya sharci ahaan Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmada.

(2) Guddoomiyuhu waa wakiilka Dawladda Dhexe ugu qaybsan Maamulka Degmada oo dhan, wuxuuna u mas'uul yahay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, wuxuuna toos ula xiriiraa ulana shaqaynayaa Guddiga Maamulka ee Gobolka oo uu ka qaadanayo tilmaamaha maamulka guud ee degmada iyo fulinta mashaariicda. Hase yeeshee wuu kala xiriiri karaa Madaxda Laamaha Wasaarad walba iyo Hay'ad kasta oo Gobolka wixii iyada gaar u saameeya.

(3) Wuxuu kaloo la shaqaynayaa xiriir toos ahna la yeelanayaa Guddiga Xisbiga ee Dagmada. Gaar ahaan Guddoomiyuhu wuxuu;

(b) mas'uul ka yahay fulinta siyaasadda Xisbiga ee horumarka dhaqaalaha iyo bulshada sida ku qoran Barnaamijka Xisbiga iyo qorshaha Dawladda ee Mashaariicda horumarinta iyo hadba awaamiirta Guddiga Xisbiga ee Degmada ee saameeysa kor u qaadidda dhaqaalaha iyo bulshada,

(t) leeyahay awood uu ku kormeero shaqaalaha iyo Laamaha Degmada oo dhan, warbixinna ka siiyo wasaaradda iyo Hay'adaha hadba ay saameyso;

(j) shirarka go'aannadoodana



(x) mas'uul ka yahay fulinta sharciyada. xeerka Wasiirrada iyo go'aannada Guddiga Maamulka ee Degmada;

(kh) mas'uul ka yahay inuu xalliyo wax alla wixii khilaafaad ah ee saameeyamaamulka Degmadiisa;

(d) Mideeyaa wax qabadka Laamaha Wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee degmada.

(4) Marka Guddoomiyaha Guddiga Maamulka Degmadu maqan yahay ama xilkiisa gudan kari waayo. waxa ku meel-gaar ahaan guddoomiye noqonaya Kaaliyaha 1aad ee Xoghayaha Xisbiga dhinaca Siyaasadda.

Qodobka 13aad

*Maamulka Dawladda Hoose*

Degmo kasta waxay yeelanaysaa Maamule Dawladda Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga oo uu magacaabo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, wuxuuna mas'uul u yahay Isuduwaha Dawladaha Hoose iyo horumarinta Reer Miyiga.

Gaar ahaan, wuxuu mas'uul ka yahay:

(b) Fulinta Sharciyada u degsan Maamulka Dawladaha Hoose iyo awaamirta Guddiga Maamulka ee Degmada;

(t) Habaynta Miisaaniyadda Dawladda Hoose. gurista canshuuraha Dawladda Hoose;

(j) Xafidaadda iyo ilaalinta Miisaaniyadda iyo Maamulka kale ee Dawladda Hoose;

(x) Kormeerka kharashka iyo hirgelinta Mashaariicda;

(kh) Fulinta. fidinta iyo ballaarinta Barnaamijka joogteynta Ololaha Horumarinta Reer Miyiga (J.O.H.R.M)

(d) Xannaanada iyo anshaxa shaqaalaha Dawladda Hoose;

(r) Wax alla wixii kale ee Guddiga Maamulka ee Degmadu u xil saaro.

Qodobka 14aad

*Xil ka qaadis ama ka wareejin ee Guddoomiyayaasha*

*Maamulka Gobol iyo Degmo*

(1) Guddoomiye Maamul Gobol ama Degmo waxa lagu beddeli karaa, xilka lagaga wareejin karaa ama shaqada lagaga joojin karaa marka laga qaado jagado Xoghayaha Xisbiga, sida ku qoran Qodobbada 22 — 24 ee xeerka Xisbiga.

(2) Xubnaha ka tirsan Guddiyada maamulka ee gobolka iyo degmada waxaa iyagana lagaga saari karaa ama lagaga joojin karaa xilka iyadoo la raacayo sida ku tilmaaman qaybta 1aad ee isla Qodobkan.

## QAYBTA 3AAD

### Xilka shaqada iyo awoodda Guddiyada Maamulka ee gobollada iyo Degmooyinka

### Qodobka 15aad

### Hawlqabadka Guddiga Maamulka Gobolka

(1) Guddiyada Maamulka ee Gobollada iyo Degmooyinka waxay awood u leeyihiin inay ka matalaan Dawladda oo dhan xagga maamulka. Laamaha Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda oo ka e oo jooga Gobollada iyo degmooyinka waxay hoos imaanayaan Guddiyada Maamulka ee heer Gobol ama Degmo.

(2) Guddiyada Maamulka ee Gobollada iyo Degmooyinka waxay mas'uul uga yihiin Wasaaradaha iyo Hay'adaha fulinta hawlaha iyo hirgelinta go'aannada Dawladda Dhexe.

(3) Madaxda Laamaha Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale ee jooga Gobollada iyo Degmooyinka waa inay la socodsiiyaan dhaqdhaqaaqa hawlahooda iyo dhibaatooyinka ka hor yimaadda Guddiyada Maamulka si loogu dhammeeyo heer Degmo ama heer Gobol ama loogu soo gudbiyo Xarunta Dhexe marba sida ay ku habboon tahay.

(4) Sidoo kale, Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale wixii hawl caadi ah ama mashaariic lagu fulinayo Gobollada iyo Degmooyinka waa inay si buuxda ugu war geliyaan guddiyada Maamulka ee Gobollada iyo Degmooyinka si isla socodka iyo iskaashiga ayan u kala go'in.

(5) Dallacaadda, abaalmarinta iyo tababarrada shaqaalaha jooga Gobollada iyo Degmooyinka waa inay ku xirnaataa warbixinta Guddiyada Maamulka ee Gobollada iyo Degmooyinka. Guddiyada Maamulka waa inay warbixintaas si joogto ah u diiibaan sannadkiiba hal mar.

(6) Anshaxmarinta shaqaalaha wixii canaan, ganaax iyo ka joojin shaqo ku saabsan waa awoodda Guddiyada Maamulka ee Gobolka iyagoo raacaya habka shirciga Shaqaalaha Dawladda u dhigan ee xusaya Guddiga Aanshaxmarinta. Waxa kale oo Guddiyada Maamulka u soo jeedin karaan Wasaaradaha iyo Wakaaladaha wixii hoos u dhig darajo iyo shaqo ka-saarid ah. Isuduwaha ama wakiil Wasaaradeed gobol ee xilkiisa ka soo bixi waaya, waa in tallaabadii ku habboonayd ka qaaddaa Wasaaraddiisa ama Hay'adda uu ka tirsan yahay, kadoib markay hesho go'aanka Guddiga Maamulka.



(7) yada Maamulka ee Degmooyinka anshaxmarinta ka iyo ganaaxa. waxay talo ahaan ugu soo gudbinayaan Maamulka ee Gobollada oo go'aan ka gaari doona, iyagoo sida ku xusan (6) kor. Guddiga Maamulka Gobolku wuxuu leeyahay inuu dib u eego markii loo baahdo go'aannada deg-

(8) Guddiga maamulka ee Gobolka wuxuu awood u leeyahay beddelka shaqaalaha isla Gobolka gudihiisa.

(9) Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale waxay Guddiyada maa- ee Gobollada iyo Degmooyinka ku wareejinayaan:

(b Mushaharooyinka shaqaalahooda jooga Gobollada iyo Deg-

(t) kharashka caadiga ah ee ku baxa socodsiinta hawlahooda, ka reebban kharashka loogu tala galay mashaariicda gaarka mushahaarooyinka iyo kharashka kale ee Wershadaha iyo Hay- ay Xaruntooda Dhexe ku taal Gobollada iyo Degmooyinka.

### Qodobka 16aad

### *Xilka Guddiga Maamulka Gobolka*

1) Guddiga wuxuu u xil saaran yahay Ho- Laamaha iyo Hay'adaha kale ee Gobolka ku oo o qabadka Guddiyada Maamulka ee yahay oo dhan oo lagu daryeelayo Guddigu waa inuu:

(b) Dejiyo hab kartiyeed oo lagu fuliyo shaqada Qaranka;

(t) uuro am wax qobadka Gobolka iyo

Caadiga ah ee Wasaaradaha iyo Hay'ada- Dhexe;

(x iyo shaqooyinka Guddiyada Maamulka gobolka;

u wakiisho guddiyada Maamulka Degmooyinka hawlihiisa

Guddiyadu isku duubnaan bay mas'uul uga yihiin iyo fulinta go'aannadooda.

### Qodobka 17aad

### *Awoodda Guddiga Maamulka Gobolka*

Guddiga Maamulka Gobolku si uu ku fuliyo hawlaha loo xil- wuxuu awood u leeyahay inuu;

(b) sameeyo, beddelo ama baabi'iyo xeerar degsan oo hoose isagoon ka hor imaanin Sharciyada Qaranka;

(t) hordhigo Guddiga Xisbiga si loo oggolaado Miisaaniyadda dawladaha hoose, iyagoo raacaya Sharciga iyo xeerarka Maaliyadda ee Dawladda intaanay u soo gudbin Agaasinka guud ee Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga ee Madaxtooyada J.D.S. iyo Wasaaradda Maaliyadda;

(j) kormeero gurista canshuuraha Dawladda Dhexe iyo dawladaha Hoose ee Gobolka;

(x) talo uu soo jeediyo, markay danta guud u baahato, hay'adda ku hawl leh inay hawl ama hanti la wareegto sida Sharcigu oggol yahay,w'xii magdhow u baahanna in Wasaaradda Maaliyadda lagala xixiiro;

(kh) kormeero hawlaha Qaranka ee ka socda Gobolka oo dhan.

Qodobka 18aad

*Xilka iyo awoodda guddiyada maamulka degmooyinka*

Xilka iyo awoodda Guddiyada Maamulka ee Degmooyinka waa sida ku qoran Qodobbada 16—17 ee sare ku xusan, hase yeeshee ku kooban Guddi kasta degmadiisa.

QAYBTA 4AAD

Qodobka 19aad

*Guddiyo Hoosaad*

(1) Guddi maamul kasta ee Gobol ama Degmo waxaa hoos imaanaya guddi Hoosaadyada soo socda oo ka kooban Madaxda Laamaha Dawladda ee hawl ahaan u qaabbilsan;

(b) Guddi Hoosaadka Dhaqaalaha iyo Iskaashatooyinka oo u qaabbilsan horumarinta dhaqaalaha iyo fulinta mashaariicda, Isuduwidda iyo dhiirrigelinta mashaariicda ISKAA WAX U QABSO, dhul wax ka soo saarka iyo iib geynta tacabka, abuurista Iskaashatooyinka, Xannaanada iyo Kobcinta Xoolaha iwm.

(t) Guddi Hoosaadka Arrimaha Bulshada oo u xil saaran caafimaadka dadka, Nadaafadda, Waxbarashada, Ciyaaraha, Fanka iyo Suugaanta iwm.

(2) Guddi Maamul kasta oo Gobol ama Degmo wuxuu ku dhex magacaabi karaa Guddi Hoosaadyada, markii loo baahdo, Guddi gaar ah oo soo baarta ama xallisa arrin degdeg ah oo mudnaansho gaar ah u leh socodsiinta Maamulka Dawladda



(3) Guddi Hoosaad kasta xubnihiisu waa in aanay ka yaraan saddex (3) qof, hase yeeshee qofku Xubin waa ka noqon karaa laba Guddi.

(4) Guddi Maamul kasta ee Gobol ama Degmo iyo qeybihiisa hoose waa u yeeran karaan dad aan Guddigooda ka tirsanayn oo aqoon gaar ah u leh arrimaha laga doodayo.

(5 Hoosaad kasta waxa u guddoomiye noqonaya Gud- Maamulka ama labadiisa kaaliye. hadba kuu wa-

inta uusan Guddoonsan arrin la xiriir- waa hore kala tashadaa guddi Hoosaadka

7) Guddi maamul gobol kasta inta uusan guddoosan arrin la Degmo, waa inuu marka hore kala tashadaa Guddiga Maamul-Degmada ee ku lug leh.

Qodobka 20aad

Guddiyada Tuulooyinka

waxaa lagu dhisaa go'aan ka soo baxay waxayna fuliyaan hawlaha Guddiyada kuna saabsan horumarinta Tuulada, xag-Maamulka.

Qodobka 21aad

*Shirarka*

kasta ee Gobol iyo Guddi Hoosaadyada waa ah ugu yaraan saddexdii bilood mar;

Guddi maamul kasta ee Degmo iyo Guddi Hoosaadyadooda fariistaa shir caadiya bil walba mar.

(3) Guddi kasta ee Tuulo waa inuu fariistaa shir caadi ah 15kii beriba mar.

aan caadiga ahayn waxay noqon karaan hadba in- waxaana isugu yeeri kara Guddoomiyaha ama codsi-ga Guddiga iyo Qaybihiisa hoose saddex meelood meel.

(5) Markii arrimo degdeg ahi la soo dersaan oo aany suuragal ahayn in shir guddiga maamulka gobolka ama degmada la isugu yeero, way u bannaan tahay guddoomiyaha inuu arrimaha sii fuliyo, waase inuu soo hordhigaa Shirka Guddiga ee ugu soo horreeya si loo ansixiyo.

Qodobka 22aad

Ansaxaadda Shirarka

Si shirka guddiga u ansaxo, waxaa lagama maarmaan ah inay ka soo qayb galaan xubnaha Guddiga maamulka ama Guddiga Hoose, hadba kii shiraya, in ka badan bar tirada Xubnaha Guddiga uu ka kooban yahay.

Qodobka 23aad

Hab codayn

Xubnaha Guddiga barkood oo mid lagu daray ayaa go'aanku ku ansaxayaa, haddiise codka «oggol» iyo «diiddan» ay isla ekaadaan, waxa adkaanaya hadba Guddoomiyuhu dhinaca uu raacsan yahay.

Qodobka 24aad

*Qoraal Shir*

Qoraalka doodaha iyo Go'aannada Shirarka Guddiyada Maamulka iyo kuwa hooseba waa in la xafidaa waana inay wada saxiixaan shir-guddoomiyaha iyo Xoghayaha Shirka.

QAYBTA 5AAD

Qodobka 25aad

*Hantida Dawladaha Hoose*

(1) Hantida Dawladaha Hoose. Qaranka ayaa leh. Guddiyada Maamulka ee Gobolada iyo kuwa degmooyinka markay isticmaalayaan hantidaas waxay fulinayaan hawl Qaran.

(2) Si ay hawshooda caadiga ah u gutaan, Dawladaha Hoose waxay karaan, iyagoo haysta oggolaanshaha Guddiyada maamulka iyo heerkooda:

(b) inay gobolka ama degmada ay ka dhisan yihiin ka sameeyaan laamo ganacsi oo shaqsiyad sharci leh iyo hawlo kale oo Ilo dhaqaale dhalin kara

(t) Inay hanti iibiyaan ama gataan iney Gobolada iyo degmooyinka ka dhisaan meelo cusub oo laga soo saaro dhaqaalaha inay Gobolka ama degmada ka sameeyaan ayagoo raacaya siyaasadda Xisbiga iyo Dawladdaba.

*Qodobka 26aad*

Miisaaniyadda Dawladaha Hoose

(1) Miisaaniyad ku talo-galka ee Dawladaha Hoose waxay ka mid tahay Miisaaniyadda guud ee Dawladda Dhexe.



(2) Sannad walba waa in Dawlad Hoose kastaa Miisaaniyaddeeda sannadka soo socda soo samaysaa iyadoo lagu soo darayo kharashka loogu tala galay Mashaariicda Horumarinta, markay diyaarisana Maamulaha Dawladda Hoose baa xil ka saaran yahay inuu u gudbiyo Guddiga Maamulka Degmada si loogu bandhigo oggolaanshaha Guddiga xisbiga ee Degmada. Oggolaanshaha Guddigaas kaddibna waxaa gudbinaya Guddiga maamulka Gobolka. iyadoo la sii marinayo Isuduwaha dawladaha Hoose iyo Horumarinta reer Miyiga, kama damgeys 30ka Setember.

(3) Marka Guddiga Maamulka Gobolku u bandhigo oggolaansho ku talo galka Miisaaniyadda Guddiga Xisbiga ee Gobolka waxaa loo gudbinayaa Wasaaradda Maaliyadda kama dambeys 31ka Oktoobar, iyagoo soo marinaya Agaasinka Guud ee Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga ee Madaxtooyada J.D.S.

(4) Miisaaniyadda waxaa loo qorayaa habka Wasaaradda Maaliyaddu dejisay, waxayna dhaqan geleyssaa marka la soo oggolaado oo lagu shaqaynayaa laba iyo tobanka bilood ee sannadka soo socda ee loogu tala galay.

(5) Haddii ay Guddi Maamul oo Degmo la noqoto inay soo sameeyaan ku celis Miisaaniyadeed waxay soo samaynayaan muddada u dhexeysa 30ka Juun iyo 30ka Setember ee sannadka Miisaaniyaddiisa lagu jiro, iyagoo muujinaya wixii miisaaniyadda dakhli dheeraad ku ah oo ay soo saareen sannadkaas, waxayna u soo qorayaan Wasaaradda Maaliyadda, iyagoo soo marinaya Guddiga Maamulka gobolka. Wasaaradda Maaliyadda waxay dhegeysanaysaa Agaasinka Guud ee Dawladda Hoose ee Madaxtooyada JDS, inta aanay oggolaan ama diidin Miisaaniyadda celiska.

(6) Haddii Wawladda Hoose soo saarto dakhli dheeraad ku ah Miisaaniyaddii Wasaaradda Maaliyaddu horey u oggolaatay, dakhliga dheeraadka ah waa in Guddiga Maamulka degmadu ku soo sameeyo Mashaariic leh horumar dhaqaale ama la xiriira horumarinta bulshada, iyadoo oggolaansho laga helayo Agaasinka Guud ee Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga ee Madaxtooyada JDS iyo Wasaaradda Maaliyadda.

(7) Haddii ay dawlad Hoose soo saari kari weydo dakhligii miisaaniyadda loogu tala galay, Wasaaradda Maaliyadda waxay u samayn kartaa miisaaniyad celis.

Qodobka 27aad

*Dakhliga*

*(1) Dakhliga Dawladaha Hoose wuxuu ka koobmaa:*

(b) canshuuraadka iyo xuquuqda kale ee loogu oggolaaday sharciyo iyo xeer dawladeed ee Dawladda Dhexe;

(t) Qaraamaadka ay ka helaan Dadweynaha iyo wixii ka soo gala iibka hantidooda qaybta la iibin karo;

(2) Haddii inta la falanqaynayo talada Miisaaniyadda ku tala gal-ka ay muuqato in Dawladda Hoose aysan daqligooda ku filaysiin karin kharashkooda wasaaradda Maaliyadda waxay kartaa inay u fidiso miisaaniyad kab waxayna dhimi kartaa kharashka.

(3) Guddiyada Maamulka ee Gobollada iyo kuwa Degmooyin-ku amaah waa ay qaadan karaan iyagoo dammaan dhigaya Banki, ama soo saaraya xaashiyo ballanqaad ah ama nooc kale ah, haddii ay si caddaan ah u tilmaamaan danta ay ka leeyihiin amaahdaas mar-ka horena ay oggolaansho ka soo helaan Wasiirka Maaliyadda.

Qodobka 28aad

*Kharashka*

Dawladaha Hoose waxay wax ku bixin karaan:

(b) kharashka socodsiinta hawlaha loogu tala galay;

(t) dhismo mashaariic cusub, iskaashatooyin iyo wixii kale oy galaan ee awooddoodo ku eg.

(j) daryeelka waxbarashada hoose iyo caafimaadka, kordhinta aqoonta guud ee bulshada iyo hiddaha iyo dhaqanka, ciyaaraha, caafimaadka iyo xannaanada xoolaha, biyo-xireen iyo wixii la mid ah;

(x) dayactirka hantida iyo qalabka Dawladaha Hoose;

(kh) samayska iyo hagaajinta Waddooyinka;

(d) dhirayntа, qurxinta iyo nadaafadda magaalooyinka;

(r) maalgelinta isla Degmada Gudaheeda.

Qodobka 29aad

Xisaabaha dawladaha Hoose

Dawladaha Hoose waa inay sameeyaan hab xisaabeed oo muujin kara waxa socda oo dhan.

*Gaar ahaan waa inay:*

(b) hayaan Diiwaannada ku dhaqankooda ay oggolaatay wasaaradda Maaliyadda ee muujinaya wax alla wixii dakhli soo galay, wixii baxay iyo sidii loo bixiyey iyo waxa u yaal;

(t) diraan xisaab celin 3dii biloodba mar.



Qodobka 30aad

*Kormeerka baarista Miisaaniyadda dawladda Hooses*

(1) Wasaaradda Maaliyaddu kormeer bay ku leedahay dakhliga Dawladaha Hoose iyo kharashkoodaba.

(2) Iyadoon la khilaafin shareiga Maaliyadda iyo nidaamka wasaaradda Maaliyadda u dejisay habka xisaabaadka bay u bannaan tahay Agaasinka Guud ee Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga inay kormeerto. amarna ka bixiso sidii kor loogu dhigi lahaa dhaqaalaha iyo Horumarka kaleba ee Gobollada iyo Degmooyinka.

(3) Hantidhawrka guud ama Hay'addii kale Sharcigu u oggol yahay baa u xilsaaran baarista qoraalka xisaabaadka.

QAYBTA 6AAD

Qodobka 31aad

*Qawaaniinta Ciqaabta*

(1) In sharci ama xeer si kale amar ku bixiyaan maahee, qof kastaa:

(b) oo u hoggaansami waaya xeer Guddiga Gobolka ama kan degmadu soo saaray;

(t) oo aan fulin amar si sharciga waafaqsan uu ku bixiyey Guddoomiyaha Guddiga, ama Maamulaha Dawladda Hoose, ama madax shaqo oo ay hawshaasi khusayso, waxaa lagu khasirayaa, haddii uusan falkaasi noqon dembi ka sii weyn, ganaax ka bilaabma 50 shilin ilaa 500 shilin. Haddii gefkaasi jebinayo xeer ama amar ku saabsan xasilloonaanta ama caafimaadka guud, qofku waxaa la xirayaa muddo gaarsiisan ilaa 3 bilood ama khasiraad gaarsiisan ilaa 3.000 shilin, ama labadaba oo laysugu daro.

(2) Dembiga ku qoran radiga 1aad ee qodobkan oo khasiraadda lacagta ah keliya lagu muteysto, waa loo oggol yahay qofku inuu kala heshiiyo Xafiiska Maamulka Dawladda Hoose ee ku shaqada leh, isagoo bixinaya, inta ayan dhaafin 7 maalmood oo ka ballaabanta maalinta loo sheego inuu galay dembigaas, lacag tiradeedu tahay kala baroo bar khasiraadda ugu yar dembiga uu galay.

